

# MA NAQDI AYAAD KU SHAQEYSAA? WAXA AAD LEEDAHAY XUQUUQDA SHAQADA

Waa sharci in naqdi wax lagugu siiyo. Shaqaalaha naqdi ayaa lagu siin karaa shaqooyin badan – dhismaha, nadiifinta, shaqada maalinleyda, wakalaadaha shaqo ku meel gaadh ah ama shaqooyinka adeega iyo kuwa kaleba. Haddii naqdi lagugu siiyo ama aanad lahayn Lambarka Caymiska Bulshada, Ogolaanshaha Shaqeynta oo Sax ah, ama aanad lahayn xaalad socdaal, weli waxa aad xaq u leedahay xuquuqda aasaasiga ah ee sharciyada shaqada. Waxa muhiim ah in aad diyaar tahay haddiiba ay timaado in xuquuqdaada shaqo oo lagu xadgudbay. Haynta tafaasiil badan oo shaqadaada ku saabsan, iyo mishaharkaaga iyo cida aad u shaqeynayso, ayaa kaa caawin karta difaaca xuquuqdaada, in aad hesho mishaharka kaa maqan ama aad dacwo ka gudbin karto.

## IS ILAALI

- Qoraal ku hayso saacadaha, taariikhda iyo meelaha aad ka shaqaysay iyo mushkilado wixii ka dhacay. Macluumaadkan guriga ku hayso ama telefoonkaaga gacanta.
- Qor intii lagu siiyay. Hay nuskhadaha xawilaada emaylka, risiidada deymaha mishaharka ama dukaamada naqdiga, ama caddeymo kale oo muujinaya in loo-shaqeeyuhu mishahar ku siiyay. Haddii ay suurawdo, dhigo naqdigaaga oo dhan xisaab banki, si aad bayaanada bankiga ugu isticmaali karto cadymo ahaan.
- Ka hay sarkaalkaaga iyo sharikada aad u shaqayso macluumaad kasta oo aad heli karto: Magaca, darajada, cinwaanka guriga iyo shaqada, telefoonada iyo lambarada gaadiidka.
- Hay wax kasta oo aad isweydaarsateen loo-shaqeeyaha: Teksts, emaylo, telefoono iyo waraaqo.
- Haddii aad naqdi ku shaqaynaysay, weli waxa aad u qalmi kartaa Caymiska Shaqada (CS). Waxa muhiim ah in aad heyso saacadihii aad shaqaysay iyo mishaharkii lagu siiyay. Dalbo CS marka aad shaqada ka joogsato.
- Loo-shaqeeyahaagu uma baahna in uu ogaado cinwaankaaga. Loo-shaqeeyaha waxa aad siin kartaa cinwaan kale, haddii aad cabsi ka qabto in aad ka runta ah bixiso. Waxa aad siin kartaa cinwaanka aad u isticmaasho bosto ahaan.
- La wadaag xaalkaaga socdaal qof ama dad aad ku kalsoon tahay.
- Haddi aad u malayso in xuquuqdaada lagu xadgudbay, markiiba u soo wac Xarunta Hawlaha Shaqaalaha gargaar. Wicis oo dhani waa bilaash waana qarsoodi.

## WAX BIXINTA

Waa sharci in naqdi wax lagugu siiyo, hase yeeshee waa in lagu siiyaa ugu yaraan mishaharka ugu yar. Loo shaqeeyahaagu waa in uu ku siiyo qoraal ahaan waxa uu ku siiyay ama “Gooska Bixinta” mar kasta oo lagu siiyaba. Waa in ay sheegto inta saacadood ee aad shaqaysay, qiyaasta mishaharkaaga, waqtiga dheeraadka ah, bixinta maalmaha fasaxa shacbiga, bixinta fasaxa iyo wixii lagaaga jaray cashuuraha iyo Caymiska Shaqada (CS) iyo Qorshaha Hawlgabka Kanada (QHK). Sarkaalka naqdiga wax kugu siiya ayaa dhici karta in uusan rabin in uu ku siiyo Gooska Bixinta iyaga oo aan doonaynayn in ay bixiyaan qaybtooda ku aadan CS ama cashuuraha. Xattaa haddii aadan helin gooska bixinta, xuquuq ayaa aad weli leedahay. Waxa muhiim ah in aad hayso saacadaha aad shaqaysay iyo mishaharka lagu siiyay.

## XAAL LA'AAN? WARAAQO LA'AAN? OGOLAANSHO SHAQO LA'AAN?

Haddii aad ku shaqaynayso adiga oo aan haysan Lambarka Caymiska Bulshada (LCB) ama aan haysan Ogolaansho Shaqo ama aanad lahayn xaalad, weli waxa aad xaq u leedahay xuquuqda aasaasiga ee sharciga ama xeerka shaqada. Waxa ka mid ah miqyaasyada shaqada, caafimaad iyo nabadgelyada, xuquuqda aadanaha iyo Guddiga Fayowga Meesha Shaqada iyo Caymiska (GFMSC) oo iyadu shaqaalaha shaqada ku dhaawacmay magdhow siisa. Dacwo ayaa aad dhigan kartaa Wasaarada Shaqada, haddii aad is leedahay xuquuqdaada waa lagu xadgudbay. GFMSC iyo Wasaarada Shaqada lama wadaagi karaan Dawlada Federaalka wixii ku saabsan socdaalka. Wasaarada Shaqadu way kuu soo heli kartaa mishaharka aad leedahay xattaa haddii aad dalka ka tegtay. Qaar badan oo aan waraaqo lahayn ayaa ka baqa in shaqada ay waayaan ama la masaafuriyo haddii ay ka hadlaan dhibo shaqada ka haysta. Waxa jira siyaabo aynu isku ilaalin karro, marka aan u dagaalamayno mishahar aan leenahay ama aynu difaacayno xuquuqdeena. Noo soo woco gargaar. Wicis oo dhani waa bilaash.

## XAGGEED GARGAAR KA HELAYSAA

**Xarunta Hawlaha Shaqaalaha:**

416-531-0778 | Khadka bilaashka 1-866-531-0778

[www.workersactioncentre.org](http://www.workersactioncentre.org)

**Isbahaysiga Isbeddel-doonka ee Shaqaalaha Soo-Gelaytiga ah:**

1-855-567-4722

[www.migrantworkersalliance.org](http://www.migrantworkersalliance.org)